

# HESHIISKA MAARAYNTA INJIRTA MADAXA EE KA DHEXAYSA DUGSIYADA, WAALIDIINTA/MASUULIYIINTA/DARYEELAYAASHA

(Insert school details)

Injirta madaxu waxay weli ku keentaa welwel iyo jaahwareer waalidiinta/masuuliyiinta/daryeelayaasha, macalimiinta iyo carruurta. Injirta madaxu ma gudbisno cudurada faafaa – waxaa lagu gudbiyaa marka ay istaabtaan labada madax oo mid injirta qabo. Iyadoo waalidiintu yihiin masuuliyiinta asaasiga ah ee la socodka iyo dawaynta injirta madaxa, kantaroolida iyo maaraynta infakshanka injirta madaxu waa masuuliyad ay wadaagaan dhowr hay'adood, kuwaas oo ay ku jiraan Wasaarada Waxbarashada iyo Tababarka; Wasaarada Adeegyada Adamiga, dugsiyada iyo waalidka. Wasaarada Waxbarashada iyo Tababarada ayaa masuul ka ah bixinta talada iyo kaalmaynta dugsiyada wixii khuseeya maaraynta injirta madaxa.

Heshiiskaani wuxuu hoosta ka xariiqayaa:

- Masuuliyadka dugsiyada iyo waalidka/masuulka/daryeelaha;
- Muhiimada dhaman wixii caafimaadka khuseeya, si loo xaqiijiyo xal ku haboon oo wax lagaga qabto injirta madaxa.

## **Masuuliyadka**

**Waalid/Masuul/Daryeelle-** Masuuliyadka waxaa ka mid ah:

- Joogto u baarida (waxaa la jeclaan lahaa asbuucii hal mar) carruurta timahooda si looga fiirsho injir ama qandhacil sidoo kalena joogto loo baaro xubnaha qoyska lana daweeyo haddii ay muhiim tahay;
- Xaqiijinta in aan ilmuhu dugsiyada la imaan tima aan laga dawayn injirta madaxa;
- Isticmaalida hab daaweyneed oo aan ilmaha caafimaadkiisa wax yeellayn (qoraalka ku lifaaqan oo dawaynta iyo kantaroolida injirta madaxa).
- Wargelinta dugsiyada haddii ilmahooda ay ku dhacday injiri iyo la socodsiinta dugsiyada marka daweyntu bilaabatay iyadoo lagu soo gudbinayo foomka loo yaqaan *Action Taken* form;
- Wargelinta daryeelaha iyo ilmahaaga saaxiibkiis si loo hello fursada lagu ogaado laguna daweeyo ilmaha haddii ay lagama maarmaan tahay.

Waan akhriyey waana ogolaaday masuuliyadka kor ku yaal:

**Saxiixa waalidka /daryeelaha/masuulka:** ..... **Taariikhda**.....

**Saxiixa waalidka /daryeelaha/masuulka:** ..... **Taariikhda**.....

**Dugsiyada – Masuuliyadka waxaa ku jira:**

- Qaybinta nadaamka iyo macluumaadka lagu hellayo, daawaynayo laguna kantaroolayo injirta madaxa oo samaynayaan waalidiinta/masuuliyiinta/daryeelayaasha iyo shaqaalaha helli kara iyo weliba yeelashada habmaamuuska barnaamijka baarida dugsiyada hirgelinayo;
- Horumarinta nadaamka dugsiyada ee injirta madaxa nadaamkaas oo xoojinaya hab sax ah oo aan isbedelayn xagga maaraynta faafida injirta madaxa, midkaas oo dugsiyada ansixiyey;
- Hellida qoraal ka raalinoqosho oo ka yimid waalidka si loo sameeyo baarida injirta madaxa, marka dugsiyada lagu qorayo ilmaha kaas oo daboolaya inta ilmuhu dugsiyada ku jiro loona magacaabi lahaa dad u tababaran inay sameeyaan baaritaanka injirta madaxa, kuwaas oo ay ogolaadeen maamulaha iyo golaha dugsiyada;
- Dhiirigelinta shakhsiyaadka uu idmay maamulaha dugsiyada sida macalin, si uu u baaro timaha ilmaha, isaga oo aan taabanayn ilmaha, haddii ilmaha shaki looga qabo injirta madaxa;
- Ku dhiirigelinta waalidka/masuuliyiinta/daryeelayaasha inay sii wadaan (waxaa la fadilayaa hal mar asbuucii) inay ka eegaan madaxa carruurtooda injirta iyo inay u muujiyaan u heelanaan iyo talo wax ku oolla waalidiinta dhibaataada ku qaba sidii loo kantarooli lahaa;
- Ku dhiirigelinta carruurta wixii ku saabsan injirta madaxa si meesha looga saaro wixii loo arko ceeb oo la xiriira injirta;
- Aqoonsiga in masuuliyada ka saarida ilmaha dugsiyada ay saaran tahay maamulaha ama qofka masuulka ka ah dugsiyada iyo in la ogaado in ka saaridu ay khusayso keliya carruurta leh injir nool ay-yana khusayn ukunta injirta madaxa. Sidoo kale waa in lala socdaa in lagu talinayo in carruurta laga saarayo dugsiyada marka maalintaas dugsiyada laga baxayo halkaas oo ilmaha la siin doono warqad ilmuhu u geynayo waalidka oo loogu sheegayo inuu ilmuhu qabo injirta madaxa.
- Waa in lala socdaa in Xeerka Caafimaadka ee 2001 aanu uga baahnayn (*Cudurada Faafa*) ilmaha la daweeyey inuu hello shahaado uu bixiyey dhakhtar ama golaha degmada markuu ku soo noqonayo dugsiyada.
- Markay ku haboon tahay, iyadoo ah awooda maamulaha, waa in loo iclaamiyaa jaalliyada dugsiyada, marka injirta madaxa lagu arko dugsiyada;
- Waa in lagu dhiirgeliyaa waalidiinta/masuuliyiinta/daryeelayaasha inay sheegaan daawada la isticmaalay iyo maalinta la bilaabay, iyadoo la buuxinayo foomka loo yaqaan *Action Taken form*.

(insert name of school) waxaa ka go'an u maaraynta injirta madaxa si xasaasi ah oo qarsoodi ah. Waxaa naga go'an masuuliyadka kor ku xusan.

**Saxiixa Maamulaha** ..... **Taariikhda**.....